**Västra Götalandsregionen**
**Regionservice**
Läkemedelsnära produkter
2021-10-11

# Ku socota adiga helay lacag deeq ah oo loogu talogalay kharashaadka dheeriga ah ee cuntada aan borotiinka qamadiga lahayn (glutenfri)

Waxaa hoos ku yaal warbixin ku socota adiga waalid u ah (mas´uul ka ah) ilmo loo qoray lacag deeq ah si loogu daboolo kharashaadka dheeriga ah markii lasoo iibsado raashinka aan borotiinka qamadiga lahayn (glutenfri).

Kaddib markii xaruntiina caafimaad idiin qortay lacagta deeqda ah ee loogu talo galay cuntada aan lahayn borotiinka qamadiga (gultenfri) waxaa adiga waalidka ah lagu soo dirayaa lacagta deeqda ah sannadkii mar. Waxaa lacagta lagu soo dirayaa Swedbank, haddii aad bangi kale leedihiin waa in akoonka loo gudbiyo Swedbank. Waxaa taas laga samayn karaa www.swedbank.se/kontoregister ama xafiiskooda. U fiirso uma baahnid inaad akoon ka furatid Swedbank ee keliya waxaad ka diiwaangelinasaa akoonkaaga haddii aad akoon ku leedahay bangi kale. Haddii aan wax akoon ah lasoo gudbin waxaa lacagta lagu soo dirayaa warqad jeeg ah. Taas waxay keeni kartaa in khidmad qofka laga qaado markii loo soo bixinayo. Waxaa soo diraya lacagta qaybta qaabilsan safarrada jirrada ee maamulka Västra Götalandsregionen, u fiirso sidaas darteed in lagu magacaabi karo ”sjukresor” marka akoonka laga fiirsho.

Mararka labada waalid ay isku cinwaan ku qoran yihiin waxaa lacagta lagu soo diraa labadooda kan wayn. Haddii labada waalid ay labo cinwaan ku kala qoran yihiin waxaa lacagta lagu diraa waalidka ay ilmaha isku cinwaan yihiin.

Lacagta deeqda ah inta ay le´egtahay waxay ku xiran tahay da´da ilmaha markii loo qorayay waxaana loogu talo galay in lagu daboolo kharashaadka dheeriga ah ee badeecadaha aan borotiinka qamadiga lahayn (glutenfri) marka loo barbardhigo cuntada caadiga ah ee laga soo adeegto dukaanka. Waxaa lacagta lasoo dirayaa sannadkii mar waxaana loo baahan yahay in dibu cusboonaysiin lagu sameeyo sannad kasta iyadoo lala xiriirayo xarunta caafimaad ee soo qortay.

| | |
|---|---|
| Cidda qortay: | |
| Qaybta: | |
| Xogta xiriirka: | |

Wixii su´aalo ah oo ku saabsan soo dirista lacagta: lmn.regionservice@vgregion.se